



Fasaxa Qoyska & Caafimaadka Lacagta La bixiyo (PFML) waxaa la bixiyaa wakhtiga fasaxa si loo daryeelo naftaada ama qoyskaaga.

- Dheefta dadka degen Massachusetts
- Waxay ku siisaa 60%–80% mushaharkaaga caadiga ah
- Waxay gaadhi kartaa 12 - 26 todobaad, iyaddoo ku xidhan sababta fasaxa
- Waxay ilaalisaa shaqadaada

PFML waxay bixisaa dhowr nooc oo Fasax ah ...



Fasaxa Caafimaadka (*ilaa 20 todobaad*)
sababtoo ah waxaad qabtaa xaalad caafimaad khatar ah oo kaa hor istaagto inaad shaqayso.



Fasaxa Cusub ee Ilmaha (*ilaa 12 todobaadyo*)
si loogu xidho imahaaga muddada 12 bilood ee koowaad ka dib marka ilmahu dhasho, la korsaday, ama la geeyay daryeelkaaga barbaarinta.



Fasaxa Daryeelka Qoyska (*ilaa 12 todobaad*)
in la daryeelo xubinta qoyska oo qabta xaalad caafimaad oo khatar ah



Fasaxa Ciidanka ee Qoyska (*ilaa 26 todobaad*)
si loo maareeyo arrimaha xubinta qoyskaaga ku jirta shaqo waajib ah (ama degdeg u geli doona), ama daryeelka xubinta qoyskaaga dhaawacmay markii hawsha waajibka ah ku jiray.

Kumaa u qalma fasax mushahar la bixiyo?

Badanka shaqaalahu waxay u qalmaan. **Sharcigaaga socdaalku maaha muhiim**. Waa inaad buuxiso shuruudahan:

- Wuxaad bixisaa cashuuraha oo waxaad helaysaa foomka cashuurta W-2.
- Wuxaad tahay shaqaale ka shaqaynaya ganacsii kasta oo Massachusetts ama wakaalada gobolka, ama waxaad ahayd shaqaale ganacsiga Massachusetts ama wakaalada gobolka gudaha 6 bilood ee u dambeeyay.

Wuxaad heli kartaa fasax ku habboon jadwalkaaga.

Dooro ama isku dar oo isku hagaaji 3 doorasho:

Fasaxa joogta ah: Had iyo jeer waxaad ka maqan tahay shaqada maalmaha isku xiga ama todobaadyada

Jadwalka fasaxa La yareeyay: Shaqadaada la yareeyay (laakiin joogta ah) jadwalka 2 todobaad ama in ka badan oo isku xiga.

Fasaxa googooska ah: Xaaladaada lama saadaalin karo ama caadi maaha. Wuxaad u baahan tahay wakhti fasax ah oo lagu habboonaysiyo jadwalkaaga.

Sida Loo Codsado

1. U sheeg loo shaqeeyahaaga waxaad u baahan tahay inaad fasax qaadato
2. Wixii ah Fasaxa Caafimaadka ama Qoyska, dhakhtarka waxa uu buuxiyaa foomka
Caddaynta Caafimaadka: mass.gov/PFMLForm1
Caddaynta Qoyska: mass.gov/PFMLForm2
3. Ku codso telefoon ama onlayn: Soo wac **833-344-7365** ama booqo paidleave.mass.gov

Waa inaad bixisaa:

- Aqoonsiga Dowladda leh sawirka (gobolka, federaalka, ama ajnabiga)
- Taariikhda aad tagtaa waxay bilaabmi doontaa oo dhammaataa (ku habboonaysiinta caddaynta caafimaadka ama qoyska)
- Lambarkaaga Amniga Sooshalka (SSN) ama Lambarka Aqoonsiga Shakhsiga Cashuur bixiyaha (ITIN)
- Loo shaqeeyahaaga EIN (ku qoran Bogoska B ee W-2 gaaga)

(Qaar ka mid ah loo shaqeeyayaasha ayaa waxay qabaa qorshayaal gaar ah. Ma isticmaalaan qorshaha gobolka Waydi loo shaqeeyahaaga sida loo codsado.)